

SHAQADA QOYSKA IYO DARYEELAHA:

Sibteembar 2020

Taageerida Da'yarta Ingiriiska Baranaysa ayadoo la adeegsanaayo Waydiimo iyo Jawaabo ku saabsan Sheeko

Shaybaarada Waxbarashada ee Gobalka Galbeed, Waqooyi galbeed, Waqooyi Bari iyo Jasiiradaha

Ka timid Xarunta Qaran ee Qiimaynta Waxbarashada ee IES

Qoysaska iyo daryeelayaasha, waxaad door muhiim ah ka ciyaaraysaa waxbarashada luuqada cunugaaga. Carruurta waxay xoojin karaan luuqadooda maalin kasta ayagoo waydiinaaya kana jawaabaaya su'aalo ku saabsan sheeko. Inta lagu jiro shaqadaan, waxaad waydiin doontaa cunugaaga inuu ka hadlo waxa uu akhriyo, maqlo, ama ka oggaado sheeko.

Niyada kuhaay:

- Adigga iyo cunugaagu waxaad adeegsan kartaan luuqadaada hooyo ama Ingiriis hadba kii kuugu awood badan.
- Ku waydiinta iyo uga jawaabida su'aalaha luuqadaada hooyo ayaa sidoo kale ka caawinaysa cunugaaga inuu barto Ingiriiska.
- Waqtigaan la qaado cunugaaga. Wax isla barashadu waa baashaal!

Maxaad u waydiinaysaa ugana jawaabaysaa su'aalo ku saabsan sheeko?

Waydiinta iyo ka jawaabida su'aalo ku saabsan sheeko waxay u sahlayaa carruurta inay adkeeyaan luuqadooda.

Aan biloowno!

Raac tallaabooyinka soo socda. **Gadaal ka firi fikradaha sheekada iyo taageerooyinka dheeraadka ah ee luuqada.**



- ▶ **Talaabada 1 aad: Wadaagga** ama **u akhri** sheeko cunugaaga.



- ▶ **Talaabada 2 aad: Waydii su'aalo** kahor, inta lagu jiro, iyo kadib akhrinta sheeko.
 - Ka caawi cunugaaga “balaarinta luuqadiisa.” Haddii cunugaagu uga jawaabo su'aalahaaga hal eray, waydii inuu erayo kale ku daro jawaabtiisa. Tusaale ayaad ka siin kartaa arrintaan.
 - Waydii su'aalaha dulmarka ah iyo kuwa macnaha hoose leh. Jawaabaha laga baxsho su'aalaha dulmarka ah ayaa ka caawinaaya cunugaaga inuu xasuusto waxa uu akhriyay. Tusaale: *Qofkee ama waxee ayay ku saabsan tahay sheekada aan akhriinayno?* Su'aalaha qotoda dheer waxay ka caawinayaan cunugaaga inuu ka fakaro sheeko uuna aruursho fikrado. Tusaale: *Maxay kula tahay inuu dhacaayo talaabada xigta?* Tusaalayaasha su'aalaha iyo jawaabaha macquulka ah ayaa ku qoran dhabarka danbe.



- ▶ **Talaabada 3 aad: Ku dhiiri geli** cunugaaga inuu **sawiro ama qoraal la sameeyo** xogta sheekada.

Yoolka Waxbarashada: Carruurta waxay xoojin doonaan xirfadahooda luuqada hadalka.

Buundooyinka: Fasalka birimada–3aad

Agabka: Sheeko aad doonayso inaad la wadaagto cunugaaga: Waraaq iyo qalimaanta midabka, qalin qori, ama qalin koobi

Shaqada Qoyska iyo Daryeelaha: Taageeriada Waxbarashada Ingiriiska Dhallaanka adoo Waydiinaaya Kana Jawaabaaya Su'aalo Ku saabsan Sheeko

Noocyada Sheekooyinka aad U akhrin karto Kalana Sheekaysan karto Cunugaaga

- Buugaagta leh sawirada iyo erayada
- alyeeyada, sheekada shaqsiyaadka, ama sheekooyinka qisada ah
- Laxanada Ilmaha Yaryar
- Gabayada, laxamada, ama oraahaha
- Dhawaaqyada
- Sheeko aad jeceshahay oo ku saabsan xubin qoys ama saaxiib

Taageerooyinka Dheeraadka ah ee Luuqada

Cunugaaga ayaa balaarin kara ama kobcin kara luuqadiisa marka uu ku waydiinaayo kana jawaabaayo su'aalo ku saabsan sheeko. Iskuday inaad adeegsato su'aalaha iyo jawaabaha hoose intaad ka doodayaan sheekada.



Su'aalaha Dulmarka ah oo aad ka waydiinayso Sheeko	Jawaabaha Laga Bixin karo
Maxay qaybtaan inta badan ka hadlaysaa?	Qaybtaan waxay ka hadlaysaa ___.
Maxaa dhacaayo?	Billoow/bartamaha/dhammaadka ___.
Qofkee door ku leh waxa dhacaayo?	Jilaayaashu waa ___.
Goorma iyo xagee ayay ka dhacaysaa?	Sheekadu waxay ka dhacaysaa ___.

Su'aalaha Macnaha fog oo aad ka waydiinayso Sheeko	Jawaabaha Laga Bixin karo
Maxay kula tahay ___?	Waxay ila tahay ___.
Ma aaminsan tahay ___ inay dhacday?	Waxay ila tahay ___ waayo ___.
Waa maxay sababta qoraagu ___?	Qoraagu wuxuu ___ waayo ___.
Maxay kula tahay inay dhici karaan talaabada xigta?	Waxay ila tahay ___ ayaa dhici doona marka xigta

Xujada Luuqada:

Carruurta waxay xoojin karaan luuqadooda maalin kasta ayagoo waydiinaaya kana jawaabaaya su'aalo ku saabsan sheeko. Hadda oo cunugaagu ka jawaabay **su'aalaha**, ku boori inuu **ku waydiiyo su'aalo** aad adigu ka jawaabayso oo ku saabsan sheekada. Carruurta way abuuri karaan su'aalo iskood ah si ay kuu waydiiyaan ama waxay adeegsan karaan qaar kamid ah su'aalaha ku jira shaxda kore. Waydiinta su'aalo waxay u sahlayaa carruurta inay balaariyaan luuqadooda isticmaalkooda maalin laha ah.

